


Kitaabka Quduuska ah ee
loogu talo galay Carruurta
Soo-jeedinayaa



Boqrkii
Quruxsanaa
ee Nacaska
Ahaa



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Janie Forest
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: Lyn Doerksen

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org


©2025 Bible for Children, Inc.

Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato
qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.



Samuu'eel, xaakinkii iyo hoggaamiyihii Israa'iil wuu gaboobay. Wuxuu sameeyey in wiilashiisa xaakino u noqdaan Israa'iil, oo ay la wareegaan jagadiisi u adeegidda Ilaah. Laakiin wiilasha Samuu'eel aad bay u xunxumaayeen. Waxay aad u jeclaayeen lacagta oo awoodooda waxay u isticmaali jireen inay ku helaan lacag si

xushmadarra ah.



Dadkii reer binu Israa'iil aad bay u dhibaatoodeen
sababta oo ah xumaantii wiilasha dartood.
Maxkamadaha waxaa ka jiray cddaalad darro.

Dadkuna wxay ahayd inay lacag

siiyaan wiilashii

Samuu'eel


mar

walba

oo ay doonaan
caawimaad.




Waa inay wax dhacaan. Maalin baa, waxaa isu soo ururay odayaasha reer binu Israa'iil oo caawimaad weyddiistay Samuu'eel. "Na sii boqr na xukuma," Odayaashii baa ka dalbaday. Ma aysan dooneynin wiilasha xun xun ee Samuu'eel inay xukumaan iyaga. Waxayna doonayeen sida boqor xukuma quruumaha kale oo dhan.



Samuu'eel wuu cadhooday. Israa'iil horay bay way
u lahaayeen boqor! Ilaaha Qaadirka ah, Midka
abidiyanka ah! Xukumay Israa'iil. Waagii horena
ka soo samatabixiyey addoonsigii Masar, una
furay badda cas inay ka soo baxsadaan halkaa.






Dbadeena siiyey reer
binu Israa'il dhulkaa
quruxda badan.



Markii uu Samuu'eel baryay Ilaah, Rabbig wuxuu ku yidhi, "Adigu kuma ay diidin, laakiinse anay i diideen, inaanan iyaga u ahaan boqor. Taasoo ahayd iney iga tagaan oo u adeegaan ilaahyo kale. Oo

codkooda dgegeyso oo u samee boqor xukuma iyaga."





Ilaah wuxuu u sheegay
Samuu'eel inuu uga digo
dadka boqorkooda
dunida inuu ka
qaadi doonno lacag
canshuur ah; Isku
caawi beerahooda
iyo beerahooda
canabka ah;
Wiilashooda
ku amar oo
ciidammadooda;
gabdhahoodana ku
amraan inay isaga
u shaqeeyaan.



BOQRTOOYADA
BEERTA CANABKA

Laakiinse dadku
waxay doonayeen
si walbaba boqor.



Ilaah wuxuu ku hoggaamiyey Samuu'eel
inuu wiil dhalinyara ah oo aad u
wanaagsan, xishood badan, oo dheer -

oo madax walba ka dheer
dadka intiisa kale. M
agaciisana wuxuu ahaa
Saa'uul. Markii
Samuu'eel arkay,
Rabbiga wuxuu yidhi,
"Kan qudhiisa ayaa
Dadkayga u
talin donna."






Si buuxda oo addeecinimo
ku jirta ayuu Samuu'eel u
caleema saaray Saa'uul
inuu boqor u noqdo reer
binu Israa'iil Markii uu u
soo bandhigay Saa'uul
reer binu Israa'iil waxay
ku dhawaaqeen
"Cimrigiisa ha
dheeraado boqorka!"





Durbadiiba markii la tijaabiyey boqor Saa'uul, Reer
Cammoon, kuwii necbaa reer Binu Israa'iil, waxay
isku wareejiyeen magaalooyinkii reer Binu Israa'iil ay
deganaaye, oo way cabsi galiyeen nin walba indhihiisa
hortooda. Muxuu yahay qorshan

naxariista
daran!



Hanjabaaddii cagajugleynta cabsida lahayd waxay
gaarta boqr Saa'uul. Ciidankiisiina wuu diyaarsanaa.







Markii labdii ciidan ay iska
hor imaadeen. Saa'uul wuxuu
burburiyey ciidankii
reer Cammoon oo
samata bixiyey
magaalooyinkii.
Boqor Saa'uul Ilaah
buu xurmad iyo sharaf
iyo muunadba siiyey,
isagoo leh "maanta
Rabbiga wuxuu
dhamaystiray
badbaadada."




Ilaah guul weyn buu siiyey maalintaa Saa'uul.
Laakiin Saa'uul marwalba ma xurmeyn jirin Ilaah.
Maalin baa, intuusann la dagaalamin Falastiiniyiinta,
Saa'uul wuxuu bixiyey
allabari Ilaah.




Wuxuu ogaa oo uu garanaya shaqadii Samuu'eel.
Isagu wuxuu ogaa Ilaah inuu ka doonayo isaga inuu
sugo ilaa uu ka yimaado Samuu'eel inuu sameeyo taa
iyada ah. Laakiinse Saa'uul
wuu adeeci waayay Ilaah.




Markii Samuu'eel yimidna, wuxuu sheegay Saa'uul,
"Waxaad samaysay wax nacasnimo ah, oo ma
aadan dhowrin amaradii Rabbiga Ilaahaaga ah.
iminka boqortooyadaadu ma sii jiri
doonto."



Saa'uul laga yaabe inay la ahayd dembi yar.
Laakiinse caasinimada Ilaah waa wax daran.



Wakhti kale oo waxaa jiray,
Inn Ilaah Saa'uul amar ku
siiyey inuu baabi'iyu dadkii
xumxumaa reer Camaaleq.
Laakiin saa'uul iyo dadkii
way reebeen boqor




Agag nolol ku
ahaaday Camaaleq.
Xitaa wali way
qabsadeen
waxwalboo qiimo
lahaa, idihii iyo
dibiyadii.
Saa'uul wuxuu
yidhi waxay u
qabsadeen
wayaalahan oo
dhan in ay ku
allabaryaan
Rabbiga.



Samuu'eel wuxuu ku yidhi Saa'uul, "Adeecidda waa ka wanaaggsan tahay allabariga. Waxaad iska diiday

ereyga Ilaah, Isna wuxuu kuu diiday inaad boqr u ahaatid reer binu Israa'iil." Saa'uulna aad buu uga xumaaday dembigii. Lakiinse wuu la soo daahay. Intii ka hadhsanayd noloshiisa oo idil ma faraxsanayn, sababtoo ah isagu ma ussan adeecin Rabbiga.



Boqrkii Quruxsanaa ee Nacaska Ahaa

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

1 Samuu'eel 8-16

"Erayadaada furniinkoodu wax buu
iftiimiyaa." Sabuurka 119:130



Dhammaad



Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Cigaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro cigaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16

